Wakhtiyada sugitaanka. Cilmi baaris ku saabsan sida ay qofka saamayn ugu yeelato aragtida ku wajahan bulshada xilliga uurka iyo dhalmada.

Warbixin ku socota dadka cilmi baarista lagu samaynayo

Adigu waxaad lamaane u tahay qof dumar ah oo uur leh oo ka qayb qaadanaysa cilmi baaristan ” Wakhtiyada sugitaanka”. Waxaanu rabnaa in aanu adiga kuwaydiino haddii aad doonayso in aad ka qayb qaadanayso mashruuc cilmi baaris ah. Dukumentigan waxa laguugu sheegayaa mashruuca iyo macnaha uu leeyahay markuu qofku ka qayb qaadato.

Muxuu yahay mashruucanu waa maxayse sababta aan anigu uga qayb qaadanayaa?

Sababaha ka dambeeya

In ilmo caloosha lagu qaado waa dhacdooyinka ugu muhiimsan nolosha. Inkastoo ay sidaa tahay haddana ma jiraan wax baaritaan oo ku saabsan sida uurka iyo dhalmada uu qofku saamayn ugu yeelan lahaa habka uu u arko bulshada. Mashruuca ”Wakhtiyada sugitaanka” ayaa ah markii ugu horaysay ee si nidaamsan baarintaan laguu sameeyo sida marka ay gabadhu uurka leedahay iyo lamaanaheeduba ay u saameeyaan aragtidooda ku aadan bulshada wakhtiga uurka iyo dhalmada.

Waxaanu annagu rabnaa in aanu adiga oo ah qofkii lamaanaha ahaa aanu kula socono inta xaaskaagu uurka leedahay iyo uurka kadiba. Lamaane waxaanu uga jeednaa haddaad adigu qabto ama la deggen tahay/kala deggen tihiin qofka dumarka ah ee uurka leh ama aad tahay qofkii waalidka ahaa ama aan waalidka u hayn ilmaha/carruurta dhalanaysa ee caloosha ku jirta. Mashruuca waxa iska kaashanaya oo uu ka dhexeeyaa umulisooyinka carruurta iyo dhakhaatiirta dhaliinka qaabilsan ee cisbitaalka jaamacada Sahlgrenska iyo akadeemiyada Sahlgrenska iyo machadka cilmiga siyaasada iyo machadka SOM (Bulshada, fekrad guud/ra’yi iyo warbaahinta)

Waxa jira cilmi baaris aad u badan oo ku saabsan sida iyo sababta ay dadku u beddelaan aragtidooda ku aadan bulshada. Laakiin ilaa iyo hadda uurka iyo dhalmada looma arag inay geedi socodka cilmi baaristu muhiim u tahay isbeddel siyaasadeed. Mashruucan waxaanu xiisaynaynaa oo aanu ku eegaynaa xiisaha loo qabo arrimaha bulshada siday u kordhaan ama u yaraadaan iyo sida uu yahay fahamka iyo fikredaha ku saabsan isbeddelka inta lagu gudajiro wakhtiga uurka iyo marka ugu horaysa ee uu qofku waalid noqdo.

Fahanka ku aadan isbeddelkani wuxuu muhiim u yahay sidii ay bulshadu u qaabili lahayd dadka muwaadiniinta ah ee xaaladan ku sugan si wax ku ool ah. Mashruucan ayaa sidoo kale loo baahan yahay si kor loogu qaado aqoonta ku saabsan waalidiintu khibradaha kala duwan ee ay u leeyihiin taageerada bulshada iyo in loo qeexo xaqiiqda la ogyahay in dumarka iyo ragu ay siyaabo kale duwan u kala xiiseeyan su’aalaha iyo inay ku kala duwan yihiin waxyaabaha qaarkood. Maadaama uu uurka iyo dhalmadu ay saamayn ku yeeshaan dadka intiisa badan iyo weliba maadaama ay yihiin dhacdooyin nolosha muhiim u ah, mashruucan ayaa loo baahan yahay si dadka loo siiyo sawir dhammaystiran si loo abuuro fahanka bulshada iyo si loo beddelo iyo weliba inaynu fahano faraqa u dhexeeya dumarka iyo raga

Ujeeddo

Waxa guud ahaa jira laba su'aalood oo aanu annagu rabno in aanu jawaab ugu helo iyadoo la kaashanayo cilmi baarista aad ka qayb qaadanayso: 1) intee in leeg ayey baaxad leegtahay sidee baase ninka gabadha qaba aragtidiisu saamayn ugu yeelanaysaa bulshada taas oo ku saabsan uurka iyo dhlmada? 2) Sidee ayey saamayn ugu leedahay uurka iyo dhalmadu aragtida bulshada ee shakhsiyaadka dadka kala duwan?

Sidee ayey u soconaysaa daraasadu?

Marka aad adigu oggolaato in aad ka qaybqaadanayso daraasada markaa kadib waxa su'aalaha ugu horeeya laguugu soo dirayaa cinwaankaaga iimeylka. Waxay qiyaastii qaadanaysaa shan iyo toban daqiiqadood in aad ka jawaabto waxaana la isticmaalikaraa in lagaga jawaabo adiga oo kaashanaya dhammaan noocyada kala caadiga ah ee qalabka elektarooniga, tusaale ahaan Iphone, Android, Ipad ama kombiyuutarka.

Wixii intaa ka dambeeya waxaad helidoontaa in shan goor laguu soo kala diro su'aalo kuwaas oo socondoona laba sannadood wax kabadan. Su'aalaha ugu horeeyaa waxay kuugu imandoonaan cinwaankaaga iimeylka qiyaastii marka ay xaaskaaga/lamaanahaaga uurkeedu yahay usbuuca 22aad. Marka aad ka jawaabto su'aalahaas waxa markaa lagu siindoonaa jeeg 100 karoon ah oo macnahiisu yahay waad ku mahadsan tahay ka qayb qaadashadaada.

Intaa kadib waxaa laguu soo diridoonaa su'aalo marka ay xaaskaaga/lamaanahaaga uurkeedo yahay usbuucii 36aad, iyo marka uu ilmuhu yahay 2 bilood, 1 sano iyo 2 sannadood. Haddii adiga iyo ilmaha hooyadii aad ka qayb qaadataan cilmi baarista la samaynayo jawaabihiina waxa loo saxayaan si shakhsi shakhsi ah ah iyo siwadajira

Foomka su'aalaha dadka loo dirayo waxa maamulaya cilmi baarayaal ka tirsan waaxda cilmiga siyaasada iyo Laboratory of Opinion Research (LORE) ee machadka SOM, ee jaamacada Göteborg. LORE waxay leeyihiin waayo aragnimo dheer oo adag si ay uga shaqeeyaan sahaminta websaatyada waxaanay isticmaaleen habab isku mid ah ilaa iyo 2002.

Cilmi baaristu waxay muujisay in xaalada caafimaadka, khibradaha dhacdooyinka uurka iyo dhaliinku ay saamayn ku yeelankaraan aragtida shakhsiga ee siyaasada iyo kalsooniga lagu qabo maamulka kala sareeya sida tusaale ahaan daryeelka bukaanka caafimaadka. Sidaa daraadeed, waanu yeelidoonaa, haddii uu qofka uurka lihi uu oggolaado taas, in laga keeno diiwaanka ku saabsan daryeelka caafimaadka hooyooyinka iyo natiijooyinka dhaliinka oo laga keenayo diiwaanka uurka ee iswiidhan (www.graviditetsregistret.se). Markaa annagu umma baahnin in aanu qofka ku waydiino foomkan su'aalo ku saabsan uurka iyo dhalmada

Cawaaqibka suurtogalka ah iyo khataraha ka imankara haddii laga qayb qaato cilmi baarista

Marka guud ahaa laysku daro ma aragno annagu wax khatara ah oo qofka ka qayb qaadanaya cilmi baarita uga imanaya. Si looga hortago oo loo badbaadiyo macluumaadka qofka iyada oo loo marayo xog shakhsiyeed xasaasiga ah si aan loo fidin ama aanay u gelin gacmo dadkale waxaanu raacnaa rootiino ama habab taxaddar leh waxaanu u maarayndoonaa sidan aanu hoos ku soo sheegidoono.

Ma isticmaalidoono in aanu waydiino su'aalo keenaya dareemo adag oo aan fiicnayn, laakiin waxa marwalba jira fursad in su'aalaha foomku ay keenaan waxyaabo qiiro leh oo ku saabsan bulshada. Waxaad adigu haysataa fursad ah in lagu sameeyo wadahadal dabagal ah oo aad la samaynayso dadka cilmi baaristan samaynaya haddii aad u baahato (uppföljning). Mashruuca cilmi baarita waxa fulinaya oo lagala kaashanayaa cilmi baarayaal khibarad u leh hogaaminta adduunka markay noqoto sida dadka loo weydiiyo su'aalaha cilmi baarista idoo aanay su'aalahaasi xumaan keenin.

Maxaa ku dhacaya warbixintayda?
Foomka su'aalaha ee aad buuxiso inta lagu jiro daraasada waxaa lagu keydin doonaa fayl qarsoodi ah oo kaliya ay heli karaan cilmi baarayaasha mashruucan gaarka ah oo ku yaal machadka jaamacadda Göteborg waxaana hoos imanaya qawaaniinta ilaalinta xogta, sida qaanuunka cusub ee Ilaalinta Macluumaadka Caalamiga ee EU GDPR. Macluumaadka shaqsiyeed sida magaca, cinwaanka e-maylka iyo lambarka amniga bulshada ee sahaminta aad dhammaystirtay muddada daraasadda waxaa lagu beddeli doonaa lambar si aan shaqsi ahaan looga gartaa. Jawaabaha sahaminta waxaa lagu kaydinayaa xog ”Graviditetsrigistret” Diiwaanka Uurka haddii uurku oggolaado. Kaliya cilmi baadheyaasha daraasada ee mas'uulka ka ah maareynta sahanka ayaa helaya furaha. Xogta ayaa la keydin doonaa 10 sano. Jawaabahaaga waa la baaraandegi doonaa si dadka aan ruqsadda haysan ay u galaan.

Sida uu dhigayo GDPR xaq ayaad adigu u leedahay in lacag la’aan lagugu siiyo wixii cilmi barista ka soo baxday ee adiga kugu saabsanaa, oo haddii loo baahdana aad saxdo wixii khaldanaa. Waxaad kaloo awood u leedahay in aad codsato in la tirtiro macluumaadka adiga kugu saabsan iyo in la xakameeyo macluumaadkaaga. Sida ugu fudud ee aad adigu ku samaynkarto arrintaas waa adiga oo la xiriira madaxa mas’uulka cilmi baaraha Elin Naurin iimeylka elin.naurin@pol.gu.se ama telefoonka 031-786 1243. Haddii xitaa loo baahdo waxa isna kaa caawinkara wakiilka ilaalinta camluumadka ee Jaamacada Göteborg. Wakiilka ilaalinta camluumaadka waxa laga helikaraa telefoonka 0766-183232 waxana magaceeda la yiraahdaa Johanna Wallin. Iimeylkeedu waa johanna.wallin@gu.se cinwaankeeda boostuna waa Box 100, 40530 Göteborg. Haddii aanad ku qanacsanayn sida loo maareeyey macluumaadkaaga shakhsiyeed xaq ayaad markaa u leedahay in aad dacwo u gudbiso Hey’adda dawlada ee ilaaliso qawaaniinta macluumaadka (Datainspektionen), waa hey’ad dawli ah oo ilaalada qaabilsan.

Sidee ayaan anigu ku helayaa natiijadii ka soo baxday cilmi baarista?

Marka la shaaciyo cilmi baaristii la sameeyey lama garandoono dadka shakhsiyaadka ah ee cilmi baarista lagu sameeyey. Natiijooyinkii ka soo baxay cilmi barista waxa lagu soo bandhigidoonaa si wadajira oo koox ah waxana lagu qoridoonaa maqaalada maadada cayniska lagu qoro iyo buuggaagta, iyo sidoo kale warbixin si fudud looga helikaro iyo qoraalaba. Maqaalada lagu qoray waxa iyagana si fudud looga helikaraa bogga internetka ee mashruuca. Waxaanu qabandoonaa dhowr siminaar oo furan halkaas oo lagu soo badhigayo natiijadii ka soo baxday mashruuca. Siminaaradan waxa lagu soo xayeysiindoonaa ama lagu soo bandhigidoonaa bogga internetka ee mashruuca.

Caymis iyo lacag bixin

Caymis kuma lihid mashruuca laakiin haddii aad ku jirto dhakhtarka waxaad ku jirtaa caymiska bukaanka jiifka (patientförsäkring).

Waxa lagu siinayaa lacag 100 karoon ah oo jeeg ahaan lagugu siinayo marka aad adigu ka jawaabto foomka su’aalaha 2aad, waana marka qofka uurka lihi uu soo gaaro usbuucii 22 ee uurka.

Ka qayb qaadashadu waa mid tabaruc ah

Ka qayb qaadashadaadu waa mid tabaruc ah marka aad doontana waad joojinkartaa inaad ka qayb qaadato. Haddii aad doorato in aanad ka qayb qaadan ama aad rabto in aad joojiso inaad ka qayb qaadato markaa uma baahnid in aad sheegto sababta aad u joojisay, sidoo kalena wax saamayn ah kuma yeelaanayso xaaskaaga ama lamaanahaaga uurka leh daawooyinka hadda u socda iyo daryeelka caafimaad ee mustaqbalka la siindoono. Haddii aad joojiso inaad ka qayb qaadato cilmi baarista waxaad haysataa fursad ah in aad doorato si aanu ugu saarno warbixintaada iyo sidoo kale jawaabihii ay bixisay xaaskaaga uurka lehiba.

Madaxa mas'uulka cilmi baarista

Jaamacada Göteborg ayaa ah madaxa mashruuca cilmi baarista

Cilmi baarayaasha gacanta ka qayb qaatay:
Elin Naurin, macalimad jaamacadda dhigta cimliga siyaasada iyo Wallenberg oo ah Machadka Akameemiyada cimliga siyaasada, ee Jaamacada Göteborg
e-mail: elin.naurin@pol.gu.se
tel: 031- 786 12 43

Helen Elden, Umuliso sare ee isbitaalka jaamacada Sahlgrenska, Macalimad ka dhigta jaamacada akadeemiyada Sahlgrenska, ee jaamacada Göteborgs.
e-mail: helen.elden@gu.se
tel: 031-786 23 54

Verena Sengpiel, Dhakhtarad takhasus gaar ah leh, Dhakhtarad ku takhasustay dhalmada iyo cudurada dumarka ee jaamacada Sahlgrenska iyo jaamacada Göteborg
e-mail: verena.sengpiel@obgyn.gu.se

Karolina Lindén, Umuliso iyo weliba diktoorad cilmiga caafimaadka ah, ee jaamacada Göteborg
e-mail: karolina.linden@gu.se

Elias Markstedt, Diktoor cilmiga siyaasada, ee jaamacada Göteborg.
e-mail: elias.markstedt@gu.se